



Mogadishu, 29th January 2017 التاريخ

**Magacaabid Guddiga Ilaalinta Anshaxa iyo asluub-wanaagga iyo Bedqabka
(integrity) Geeddisocodka Doorashada Madaxweynaha JFS.**


Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya


- Markuu arkay:** Qodobka 89 (1) ee Dastuurka Federaalka;
- Markuu Arkay:** Qaraarka GSH/B-10/002/17 ee 24^{ka} Jannayo 2017 oo Baarlamaanka Federaalka ku go'aamiyey in la dhiso Guddi ilaaliya anshaxa iyo asluub wanaaga geeddisocodka doorashada Madaxweynaha JFS, iyo in doodwadaag loo sameeyo Musharrixiinta Madaxweynaha;
- Markuu dhegeystay:** Talada Guddiga Baarlamaanka Federaalka u xilsaaray Maamulidda Doorashada Madaxweynaha JFS;
- Ka dib markii uu la tashaday:** Guddoonka iyo Ku-xigeennada Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka

WUXUU GUDDOOMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

1. Laga bilaabo 29-ka Jannayo, 2017 waxaa la dhisay Guddiga Ilaalinta Anshaxa iyo Asluub-wanaagga iyo Bedqabka (*integrity*) Geeddisocodka Doorashada Madaxweynaha JFS.
2. Ujeeddada loo dhisay Guddigan waxaa looga gol leeyahay in uu Baarlamaanka Federaalka, iyo Musharrixiinta u tartamaya Xafiiska Madaxweynaha Jumhuuriyadda iyo dadweynaha Soomaaliyeed u hubiyaan habsami u socodka, daahfurnaanta iyo bedqabka lagu hirgelinaayo Geeddisocodka doorashada Madaxweynaha JFS.
3. Guddigan wuxuu u xilqaaman yahay lana xisaabtamaya Baarlamaanka Federaalka, wuxuu iskaashi hawleed la yeelanaya Guddiga BFS u xilsaaran Doorashada Madaxweynaha JFS, wuxuuna u hoggaansamaya kuna shaqaynaya tilmaamaha labada Guddoomiye ee Baarlamaanka Federaalka iyo ku-xigeennadooda.

4. Guddiga wuxuu ka kooban sagaal (9) xubin oo halkan hoose ku taxan, ahna muwaadiniin oo aan ka mid ahayn xildhibaanada BFS:
1. Faduma Qaasim Tayeb
 2. Prof. Cabdi Axmed Maxamed (Baffo)
 3. Shamsa Ibrahim Boolis
 4. Prof. Cabdi Ismaaciil Samatar
 5. Rooble Axmed Daahir
 6. Fadumo Jaamac Jibriil
 7. Prof. Mahad Maxamed Sh. Xassan
 8. Aadan Xassan Cabdi
 9. Cabdullahi Maxamed Shirwac
5. Guddiga waajibaadkiisa waa:
- a. Inuu u kuurgalo habraaca iyo dhammaan hawlgallada la xiriira hirgelinta doorashada Madaxweynaha JFS;
 - b. In wixii khilaafsan Xeer-Hoosaadka ama nidaamxumo u keeni kara bedqabka Geeddisocodka uu haddiba ku wargeliyo Guddoonka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo ku-xigeennadooda;
 - c. In Guddoonka BFS u gudbiyo warbixin–maalmeed oo ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee la xiriira Geeddisocodka Doorashada ama saamayn ku yeelan kara nidaamka doorashada; iyo,
 - d. In uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya u soo diyaariyo warbixin kama dambays ah oo ku saabsan heerka bedqabka doorashada lagu hirgeliyey.
6. Sidoo kale ayadoo la fulinaayo sida uu farmay Qaraarka Baarlamaanka kor ku xusan, waxaa la magacaabay Mudane Omar Aadan Maxamed (Cumar Qaadi) in uu noqdo xiriiriyaha daadihiya doodwadaagga Musharixiinta u tartamaya xilka Xafiiska Madaxweynaha JFS.
7. Muddada xilhaynta xubnaha guddiga iyo xiriiriyaha doodwadaaggaba waxay dhammaanaysa isla maalinta la doorto Madaxweynaha JFS, xuquuqda ay yeelanyaanna waxaa go'aaminaya Guddiga BFS u xilsaaran Doorashada Madaxweynaha JFS, waxaana isla markiiba fulinaya Xoghayaha Guud ee BFS.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya



Muqdisho, 29-ka Jannayo 2017

Tell: +252 612224442/+252 615577472

E-mail. speaker@parliament.gov.so

Website: www.sfp.so